Amniga iyo Dhaqdhaqaaqa – Daraasad Kooban No.2

Abuuritaanka Deegaanka Cusub ee Cirifka Magaalada ah: Barakaca iyo Dib-u-dejinta ee Boosaaso

(Maarso 2019) Daraasaddan waxa ay soo koobeysaa natiijooyinkii ugu muhiimsanaa ee mashruuca cilmibaarista ee Amniga iyo Dhaqdhaqaaqa ee la sameeyay intii u dhexeysay 2017-2019. Mashruuca Amniga iyo Dhaqdhaqaaqa oo ay maalgeliyeen DFID iyo ESRC waxa uu diiradda saarayay aragtiyada iyo khibradaha dadka barakacay oo deegaan ka dhigtay afarta magaalo ee Baydhabo, Boosaaso, Hargeysa iyo Muqdisho. Afartan magaalo waxa ay hoos tagaan maamullo siyaasadeed oo kala duwan, laakiin waxa ay wadaagaan dabeecado guud. Marka koowaad, waa magaalooyin si xowli ah u koraya dhanka cabbirka iyo cufnaanta, midda labaad, oo ah mid kamid ah waxyaabaha ugu muhiimsan ee keenay kobocan, waa isu guurguur xooggan oo gudaha dalka ah oo ay sababtay barakac khasab ah. Inkastoo waxyaabo badan oo la xiriira xaaladda dhaqaale iyo bulsho ee dadka barakacay ay wadaagaan magaalooyinka, waxaa jira kala duwanaan dhinaca khibradda taariikheed ee 'magaaleynta xeryaha barakacayaasha' iyo dadaallada gudaha iyo kuwa caalamiga ah ee lagu maareynayo xeryaha barakacayaasha iyo goobaha kale oo ay degaan barakacayaasha. Qoraalkan kooban waxa uu diiradda saarayaa khibradda barakacayaasha magaaada dekadda leh ee Boosaaso, oo ah caasimadda ganacsiga ee Maamul-goboleedka Puntland.

Sawir qaade: Nuurow, Bosaaso - Deegaanka cusub ee barakacayaasha

Natiijooyinka ugu muhiimsan

- Deegaanno cusub oo dib-u-dejin loogu sameynayo barakacayaasha ayaa ka bilowday cirifka magaalada. Qorshayaasha dib-u-dejinta waxaa isla naqshadeeyay islana hirgeliyay hay'ado caalami ah iyo dowladda hoose waxana ay kaalin ka qaadatay magaaleynta heer xaafadeed.
- Inkastoo barakacayaal badan ay dareemeen in ay ka faa'ideysteen qorshaha dib-u-dejinta (tusaale ahaan iyaga oo helaya dhul ay degaan), haddana waxaa ay dhib ku qabaan helitaanka adeegyada aasaasiga ah, gaar ahaan waxbarashada.
- Dad badan oo la wareystey oo hadda deggan goobahan, weli si toos ah ugama faa'ideysanin barnaamijka dhul bixinta. Cabsi ayay ka qabaan in mar kale la barakiciyo, iyadoo ay u dheer tahay culeyska in aanay heysanin guriyeyn ku filan.
- Culeyska waxaa sii kordhiyay iyadoo aanay jirin shaqooyin mushaar lagu qaato, iyo suuqa xoogsatada oo tartan badan uu ka jiro.
- Dumarka waxa ay dhabarka u ritaan culeyska dhaqaale ee ugu badan ee quudinta qoyska, rabshadaha qoyskana waa mid baahsan.

- Dadka ku nool xaafadaha cusub waxa ay intooda badan kasoo jeedaan beelo aanan ku badneyn Boosaaso. Xaafadaha la dego oo beelo u kala qeybsan waxa ay keeni kartaa khatar ah in colaado dhacaan mustaqbalka.

Taariikhda Magaalada

Tan iyo markii ay dagaalladdii sokeeye ka bilowdeen 1980-aadkii, magaalada Boosaaso waxaa laga badbaadiyay rabshado baahsan oo saameyn ku yeeshay magaalooyin kale. Magaalada waxa ay isku beddeshay magaalo xarun u ah ganacsiga caalamiga ah ee maamulka Puntland oo la aasaasay sanadkii 1998. Boosaaso waxa ay caan ku tahay ganacsiga caalamiga ah oo welina sii kordhaya. Inta badan shaqaalaha qeybta ka qaatay kobaca muuqaal iyo midka dhaqaale ee magaalada waa dad kusoo barakacay. Intooda badan dadkan waxa ay kasoo jeedaan beelo kasoo qaxay dagaalladii 1990-aadkii ka dhacay koonfurta Soomaaliya oo ay ku jiran kuwo ka dhashay beelo aanan hubeysneyn oo taariikh iyo dhaqan ahaanba la takooro. Kadib sanadkii 2006, dad tiro badan oo kasoo barakacay deegaannada maanta hoos taga Maamulka Koonfur Galbeed ayaa usoo barakacayay Boosaaso iyagoo kasoo cararaya dagaallada sii xoogeystay iyo abaaro is-xig-xigay.



Khariidad: Peter Chonka

Boosaaso waxa ay soo jiidatay indhaha barakacayaasha Soomaaliya sababo kala duwan aggood. Waa magaalo dhaqaalaha wax dhoofinta iyo soo dejinta ku tiirsan taasoo soo jiidatay indhaha dadka raadinaya in ay magaalada ka shaqeystaan, qaar badan oo kamid ahna xoogsato ka noqdo dekadda, dhismooyinka, ama ka shaqeeya guryaha. Dekadda Boosaaso waa bardhamaadka safar dhaqaale muhiim ah oo kasoo bilowda gobollada koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya. Dad badan ayaa yimid magaalada oo doonayay in ay ka gudbaan marinka Khaliijka Cadan si ay u gaarana Yemen, kuwaasoo fursado ka raadsada Jasiiradda Carabta ama ilaa Yurub usii gudba.

Iyadoo qeyb ahaan loo tiirin karo tahriibka ka dhasha colaadaha, Boosaaso si dhakhsi ah ayay u fidday. Sawirrada satellite-ka ee magaalada lagasoo bilaabo sanadkii 2003 waxa ay muujinayaan sida baahsan oo ay ugu fidday dhinaca bari oo guryo dib-u-dejin laga dhisay.

Koboca bartamaha/bariga Bosaaso 2003/2017 (Google Earth)

Intii u dhexeysay sanadihii 2005 iyo 2014, barnaamij ay isla bilaabeen dowladda hoose ee Boosaaso iyo daneeyayaal caalami ah, oo ay kamid tahay UN Habitat, waxa ay dib-u-dejin u sameeyeen qiyaastii 1700 qoys oo ay dhul ka siiyeen dhinaca bari ee magaalada, marka la dhaafo wadada cusub. Iyadoo lagu saleynayo hannaanka dhul bixinta wakhtiyeysan oo ay dadka ka faa'ideysanayo lahaansho buuxda u helayaan dhulka marka ay deganaadaan 15 sano, dadka dib-u-dejinta

loo sameeyay waxaa la siiyay guryo dhagax ka dhisan ama guryo jiingaad ah oo ay degaan. Xaafado cusub ayaa kasoo if-baxay dhinaca bari ee magaalada. Xaafadda cusub waxa ay xiriir la leedahay magaalada waxana isku xera waddo iyo qaabdhismeed muuq iyo mid bulshaba. Xarumo boolis, xarumo caafimaad, iskuullo iyo masaajidyo ayaa laga dhisay goobtan oo isku beddeshay xaafad ama magaalo yar.

Qaabka cilmibaarista loo sameeyay iyo dadka ka qeyb qaatay

Guud ahaan, 2017/2018 cilmibaarayaasha Amniga iyo Dhaqdhaqaaqa waxa ay wareysteen 120 qofood oo rag iyo dumar isugu jira, intooda badanna ahaa dad barakacayaal ah oo ay da'doodu iyo qabiilladoodu kala duwan yihiin kuna kala nool afarta magaalo. Ilaa 40 qofood oo barakacayaal ah (10 qofood magaalo kasta) ayaa loo qeybiyay kaamirooyin ay u isticmaaleen in ay ku qaadaan sawirro ka turjumaya nolosha maalinlaha ah. Sawirrada ku lifaaqan qoraalkan kooban waxaa qaaday dad barakacayaal ah. Dhammaan dadka lagu wareystay Boosaaso waxa ay ku noolaayeen xaafadaha cusub ee dhawaan laga dhisay dhinaca bari ee magaalada, laakiin qaar iyaga kamid ah kaliya ayaa ka faa'ideystay qorshaha dhul bixinta. Inta badan dadka la wareystay waxa ay ka yimaadeen gobollada koonfureed waxana ay u kala dhasheen beelo kala duwan.

Natiijooyinka cilmibaarista

Dadka ku nool xaafadda cusub waxa ay sheegeen in ay helaan adeegyada aasaasiga ah. Adeegyadan waxaa kamid ah daryeelka hooyada iyo dhallaanka, iyo booliska. Guryaha xaafaddan waxa ay xiriir gaadiid la leeyihiin magaalada, dhaqaalaha deegaankana waxa kobciyay suuqyo cusub iyo ganacsiyo yaryar oo laga furay.

Sikastaba ha noqotee, inta badan dadka barakacayaasha ah waxa ay wajahaan cadaadis dhaqaale oo xooggan waxana ay ku nool yihiin xaalad adag. Dadka la wareystay waxa ay ka hadleen shaqo la'aan iyo halgan maalinle ah oo ay ugu jiraan in ay lacag helaan. Dadka la wareystay dhammaantod waxa ay ku tiirsanaayeen shaqo xoogsi ah, waxana ay u nuglaayeen in xooggooda lagu xadgudbo. Barakacayaasha waxa ay qeyb muhiim ah ka yihiin shaqaalaha waxana ay kaalin ku leeyihiin kobaca magaalada. Shaqadooda ayaase ah mid aan joogto ahayn, inta badanna looma qiro. Hakad ku yimid shaqadii dekadda sanadihii dambe waxa uu saameyn weyn ku yeeshay barakacayaasha oo shaqo maalmeed u raadsan jiray. Qaar badan oo aan wareysannay waxa ay wax ka dhex raadsadaan goobaha qashinka gudaha iyo bannaanka magaalada. Shaqaaleysiinta caruurta waa mid baahsan, tusaale ahaan wiilasha waxa ay dhex wareegaan gudaha magaalada waxana ay ku shaqeystaan caseeyenimo.

Sawir qaade: Yaasiin - Dumar wax ka dhex raadsanaya goob qashin

Dadka waxa aanay weli helin qaar kamid ah adeegyada aasaasiga ah, dadka la wareystayna waxa ay si gaar ah uga hadleen waxbarashada. Adeegyada waxbarasho waa kuwo xaddidan waxana ay u muuqataa in caruur aan badneyn oo ku nool deegaanka cusub ay si joogto ah u aadaan iskuullada. Iskuullada markii hore waa la dhisay, laakiin masii shaqeynin. Waxaa ay si guud caruurta u dhigtaan dugsiyada Qur'aanka oo si gaar ah loo leeyahay kana shaqeeya xaafadda.

Barakaca waxa uu si kala duwan u saameyaa ragga iyo dumarka. Dumarka waxa ay inta badan dhabarka u ritaan culeyska dhaqaale ee quudinta caruurta. Waxa ay shaqeeyaan wakhti badan si ay u helaan lacag yar, waxana u wehliya masuuliyadda dheeraadka ah ee daryeelka caruurta, biyo aroorka, iyo shaqada guriya. Ragga intooda badan ma awoodaan in ay qoyska quudiyaan. Xasaradaha qoysaska waa mid baahsan, inta badanna waxaa uu ka dhashaa in lagu murmo dhaqaalaha soo gala qoyska iyo sida loo isticmaalayo, iyadoo ragga ay doonayaan in ay khaat kusoo iibsadaan. Dumar badan oo la wareystay waxa ay ahaayeen garoob lasoo furay ama iyaga iyo caruurtooda waa laga tagay. Dad badan oo la wareystay waxa ay dareensanaayeen in amniga uu soo hagaagay markii dib-u-dejinta loo sameeyay, islamarkaana ay qeyb ka yihiin barnaamijyada sida roondada xaafadda si amniga loo sugo. Sikastaba ha noqotee, dambiyo iyo xadgudugbo waa ay jiraan, sida xadgudub galmo. Aragtiyada ku aaddan u dhawaanshaha booliska iyo xoogagga kale ee dowladda waxa ay ahayd mid aanan kala caddeyn. Qaar kamid ah dadka la wareystay waxa ay si xooggan uga hadleen soo hagaagidda amniga in ay ku dareemeen badqab, halka qaar kale ay ka dhawaajiyeen cabsigelin sida marka dad xiriir la leh booliska ay si khasab ah deyn ku qaataan, waxa ay

sidoo kale ka hadleen rabshado ay kala kulmaan rag ku lebisan dareeska ciidamada.

Hantida ayaa muhiim u ah dhammaan dadka la wareystay, gaar ahaan dhulka iyo amniga guryaha. Inta badan dadka la wareystay waxa horey loogasoo saaray goobo ay ka degganaayeen Boosaaso. Qaar ayaa ka welwelsanaa in heshiis aan rasmi ahayn oo ay ku galeen in ay goobta degganaadaan uu dhici rabo, waxana ay muujiyeen hubaal la'aan ku aaddan mustaqbalkooda. Qiimaha hantida maguurtada ah oo sii kordheysa magaalada Boosaaso ayaa ka qeyb qaadaneyso kobaca deegaannada cusub. Kasoo saarista barakacayaasha iyo dib-u-dejintooda gudaha Boosaaso waa mid socota. Dadka dib-u-dejinta loogu sameyay xaafadaha cusubna waxaa kusoo biiray qaraabadooda, barakacayaal cusubna waxa ay soo degayaan teendhooyin waxana ay heshiis isticmaal dhul la galayaan milkilayaasha dhulalka iyo dadka dib-u-dejinta loo sameeyay. Qaababkan waxaa ka dhalanaya noocyo kala duwan oo guriyeyn iyo guryo dhagax ka dhisan iyo kuwo buush ka dhisan oo isku dhex jira. Barakacayaasha cusub inta badan waxa ay dhistaan teendhooyin, waxana ay lacag kiro ah siiyaan milkilayaasha dhulka. Dadka la wareystay waxa ay sidoo kale ka cabanayeen kuleylka guryaha jiingadaha ka sameysan, oo ay inta badan dhisteen iyagoo taageero ka helaya hay'ado bixiya gargaar bini'aadamnimo.

Sawir qaade: Nuurow – guryo dhagax iyo kartoon ah

Deegaanka did-u-dejinta cusub loogu sameeyay barakacayaasha waxa uu muuq iyo bulsho ahaanba ka soocan yahay magaalada weyn. Deegaanka cusub waxaa intooda badan deggan dad kasoo jeeda koonfurta Soomaaliya oo ay kamid yihiin beelo tiro yar oo dhaqan ahaan la heyb sooco. Inkastoo dad badan oo aan wareysannay ay ka hadleen in uu soo hagaagay xiriirka u dhexeeya dadka deggan magaalada iyo barakacayaasha, kala sooca xaafadaha ay degaan barakacayaasha waxa suuragal ah in ay mustaqbalka keento colaado. Khatarahan waxaa sii xoojiyay howlgallada joogtada ah oo ay maleeshiyooyinka sida Al Shabaab ama ururka xiriirka la leh Islamic State ka wadaan Boosaaso iyo deegaannada ku xeeran. Muddooyinkii hore, xoogagga amniga Boosaaso waxa ay beelaha gaar ee kasoo jeedo koonfurta Soomaaliya la xiriirin jireen xoogagga Islaamiyiinta ah taasoo ay ka dhalatay xerxeritaan aan kalasooc lahayn iyo xitaa tarxiil.

Isbarbar dhig iyo laga bartay goobaha kale ee cilmi-baarista laga sameeyay

Marka la barbar dhigo magaalooyinka kale ee cilmi-baarista laga sameeyay, Boosaaso waxa ay tusaale cad u tahay barnaamij dib-u-dejin barakacayaal guuleystay. Dadaallada beesha caalamka iyo dowladaha hoose waxa ay dib guryo u siiyeen dad aad u badan. Dib-u-dejinta cusub waxa ay soo jiidatay barakacayaal cusub oo yimid magaalada. Inkastoo dadaallo kuwan lamid ah laga sameeyay Hargeysa, haddana waxa ay ahaayeen kuwo kala fog dad yarna ay ka faa'ideysteen. Xeryaha barakacayaasha Hargeysa waxa ay sanadihii dambe isku beddeleen deegaanno aan rasmi ahayn waxana ay qeyb ka yihiin dadka ku nool bartamaha magaalada. Qaar badan oo kamid ah dadka deggan guryahan aan rasmiga ahayn waxa ay u dhasheen beelaha ugu badan Hargeysa, halka inta badan barakacayaasha Boosaaso ay kasoo jeedaan beelana koonfureed. Dadaal badan ayaa loo baahan yahay in la sameeyo si dadka deggan xaafadda cusub ee Boosaaso loogula mideyn lahaa qaab dhismeedka maamul ee dowladda hoose.

Khibradda Boosaaso waxa ay cashar fiican u tahay jaangooyayaasha siyaasadda magaalooyinka kale. Magaalooyinka Muqdisho iyo Baydhabo waxaa weli sii socdo barakaca khasabka ah, dad cusub ayaana usoo barakacaya, laakiin qorshayaal dib-u-dejin isku xeran weli lagama fulin. Khibradda Bosaaso waxa ay muujineysaa in ay lagama maarmaan tahay in wadahadal qota-dheer yeeshaan beesha caalamka, dowladaha hoose iyo dadka la doonayo in qorshayaasha dib-u-dejinta ka faa'ideystaan gaar ahaan qorsheynta dhulka, nooca guryaha, iyo joogteynta iyo gaarsiinta adeegyada aasaasiga ah.

Natiijooyinka cilmibaaristan waxaa loo jeediyay maamullada dowladaha hoose, hay'adaha gargaarka caalamiga ah, bulshada rayidka iyo ka qeyb qaatayaasha cilmibaarista ee afarta magaalo iyadoo bandhig sawirro iyo doodo la sameeyay bishii Janaayo ee sanadka 2019. Faafaahin buuxdo ee mashruuca iyo bandhigyada waxa aad ka heli kartaa halkan: http://securityonthemove.co.uk/events/ Bandhigyo lamid ah waxaa lagu qabtay Oslo (Febraayo 28), London (Maarso 14), iyo Nayroobi (Abriil). Haddii aad qabto su'aal la xiriirta cilmibaarista fadlan la xiriir Jutta.bakonyi@durham.ac.uk ; peter.chonka@kcl.ac.uk ; manedle100@gmail.com ama kirsti.stuvoy@nmbu.no

[Warbixintan waxaa turjumay Tayo Translations]